LIFAAQA II
ADDENDUM II

BUUGA XUBNAHA EE BADGERCARE PLUS iyo MEDICAID SSI AFAFKA KALE KU QORAN EE XUBNAHA

ADEEGA TURJUBAANADA

English – For help to translate or understand this, please call 1-888-713-6180. Wisconsin Relay Service at (800) 947-3529

Spanish – Si necesita ayuda para traducir o entender este texto, por favor llame al teléfono 1-888-713-6180. Wisconsin Relay Service at (800) 947-3529

Russian – Если вам не всё понятно в этом документе, позвоните по телефону 1-888-713-6180. Wisconsin Relay Service at (800) 947-3529

Hmong – Yog xav tau kev pab txhais cov ntaub ntawv no kom koj totaub, hu rau 1-888-713-6180. Wisconsin Relay Service at (800) 947-3529

Chinese – 注意：如果您说中文，您可获得免费的语言协助服务。请致电 1-888-713-6180. Wisconsin Relay Service at (800) 947-3529

Somali – WARGELIN: Haddii aad ku hadasho afka Soomaaliga, adeegyada caawimada luqadda waxaa laguu heli karaa iyagoo lacag la'aan ah. Wac 1-888-713-6180. Wisconsin Relay Service at (800) 947-3529.

Lao – ໝາຍເຫດ: ຖ້າທ່ານເວົ້າພາສາລາວ, ທ່ານສາມາດໃຊ້ການບໍລິການຊ່ວຍເຫຼືອດ້ານພາສາໄດ້ ໂດຍບໍ່ເສຍຄ່າ. ໂທ 1-888-713-6180. Wisconsin Relay Service at (800) 947-3529.

Adeegga Turjubaanada waa mid lacag la'aan ah.

TELEEFANADA MHS / NHP EE MUHIKA AH

Adeegga Macaamiisha	1-888-713-6180	24/7
Gargaarka degdegga ah	1-888-713-6180	La soo wici karo 24ka saac ee maalinta, todobada cisho ee todobaadka
TDD/TTY (maqalku ku adag yahay)	1-800-947-3529	Wisconsin Relay Service

Soo Dhawaada

Ku soo dhawaada MHS / NHP. Marka aad ka tirsan xubnaha MHS / NHP waxa aad xaq u leedahay in aad ka hesho adeegga caafimaadka dhakhaatiirka iyo isbitaalada ku jira shabakadda MHS / NHP. Dhakhaatiirta aad tagto waa in ay ku jiran liiska MHS / NHP. Waxa aad soo wici kartaa Adeegga Macaamiisha ee 1-888-713-6180. Dhakhaatiirta qaadanaya bukaan cusub waxa lagu qoraa Liiska Dhakhaatiirta.

ISTICMAALKA KAARKA CAAFIMAADKA EE FORWARDHEALTH

Kaarkaaga ForwardHealth waxa aad u adeegsan kartaa inaad adeeg ku hesho macaashka BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI. Kaarka ForwardHealth wuu ka duwan yahay kaarka caafimaadka ee HMO. Markasta soo qaado kaarka ForwardHealth oo tus dhakhtarka iyo isbitaalka kasta oo aad tagto iyo mar kasta oo daawo laguu qoro. Waxaa laga yaabaa dhakhtarka ama daawada aad dhib kala kulanto haddii aadan heysan kaarka. Sidoo kale waa in aad keentaa kaararka ceymiska kale ee aad heysato. Waxaa ka mid ah aqoonsiga iyo kaarka ceymiska ee HMO iyo kuwa kale.

DOORASHADA DHAKHTARKA JOOGTADA AH

Marka aad u baahan tahay inaad dhakhtar aragto, waxaa haboon inaad ugu horeynta wacdoi dhakhtarkaaga joogtada ah. Waa muhim inaad leedahay dhakhtar joogta ah oo caafimaadkaaga la socda. Waxa aad dhakhtar joogta ah ka dooran kartaa liiska dhakhaatiirta ee bukaan cusub qaadanaya liiska MHS / NHP. Dhakhaatiirta HMO waa kuwo aad u texgeliya kala duwanaashaha dhaqanka ee bukaanka. Si aad u doorato dhakhtar joogta ah ama aad u bedesho dhakhtarka joogtada ah, soo wac adeegga macaamiisha ee 1-888-713-6180. Dhakhtarkaaga joogtada ah ayaa go'aan ka gaaraya haddii aad dooneyso inaad aragto dhakhtar kale ama mid takhasus gaar ah leh kuuna diraya. Xusuusnoow, waa in aad ogolaasho ka heysataa dhakhtarkaaga joogtada ah ka hor inta aadan dhakhtar kale arkin.

Dumarku waxa ay arki karaan dhakhtar ku tusay cudurada haweenka sida kuwa Uurka iyo Dhalmada (OBY/GYN) ama umuliso, iyada oo aan u baahneyn ogolaashaha dhakhtarka joogtada ah.

Dadka Degan Dhulka Magaalooyinka KA Baxsan (Degmadaada hal dhakhtar oo HMO ah ayaa ka jira).

Haddii aad degan tahay dhulka ka baxsan magaalooyinka ee hal HMO ka jiro dhakhtarkaaguna uusan ku jirin dhakhaatiirta MHS / NHP, waxa aad dhakhtarkan arki kartaa muddo ku siman 60 maalmood. Fadlan u soo wargeli HMO sida ugu dhaqsaha badan marka aad dhakhtar joogta ah sameysato. Haddii uusan dhakhtarkaas ku jirin shabakadda HMO 60 maalmood ka dib, waxaa lagu siinayaa liiska dhakhaatiirka shabakadda si aad uga doorato dhakhtar shabakadda ku jira.

HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA EE AAD DOONEYSO

Gargaarka Degdegga Ah

Gargaarka degdegga ah waa daryeelka caafimaadka ee markiiba aad dooneyso. Waxaa ka mid ah:

- Margashada
- Murqo urur aad u daran
- Qalal soo noqnoqda ama muddo dheer socda
- Jabniin khatar ah
- Gubasho aad u daran
- Xanuun aad u daran
- Dhiig bax aad u daran ama aan caadi aheyn
- Wadno xanuun degdeg ah

- Sumoow
- Jirka oo bar naafo noqda (shalal)
- Naafsiga oo ku adkaada
- Miyir beel

Haddii aad dooneyso gargaar degddeg ah, la xiriir dhakhaatiirta MHS / NHP. Haddii ay xaaladaadu aad u darah tahay, tag dhakhtarka kuugu dhow (isbitaalka ama dhakhtarka). Wac 911 ama booliska ama dab damiska haddii ay xaaladu tahay mid aad u daran oo aadan dhakhtar kuugu dhow gaari karin.

Haddii ay khasab kugu noqoto inaad tagto dhakhatar aan ku jirin liiska MHS / NHP, soo wac 1-888-713-6180 si aad noola socodsiiso waxa dhacay.

Xusuusnoow, gargaarka degdegga ah ee isbitaalada waxaa loogu tala galay xaaladaha degdegga ah oo kaliya. Haddii aanay xaaladdaadu aad u darneyn, wac dhakharkaaga ama khadkeena gargaarka degdegga ah ee 24ka-saac ee 1-888-713-6180 ka hor inta aadan tagin gargaarka degdegga ah. Haddii aadan garaneyn in xanuunka ku haya aad u tagto gargaarka degdegga ah, soo wac 1-888-713-6180. Waxaanu kuu sheegeynaa halka aad ka heleyso daryeel caafimaad.

Daryeelka Degdegga Ah

Daryeelka degdegga ah waa dhakhtarka aad aragto inta aad sugeyso dhakhtarkaaga laakiin **aadan tageyn** gargaarka degdegga ah. Xaaladahaas waxaa ka mid ah:

- Jugta
- Gubashada fudud
- Is goynta fudud
- Jabniinka intiisa badan
- Cudurada ka dhasha isticmaalka daawada
- Dhiig baxa aan aad u darneyn
- Muruq go'a

Daryeelka degdegga ah ee waa inuu ka diiwaan gashan yahay MHS / NHP ama ogolaashaha MHS / NHP in aad aragto dhakhtar aan ka diiwaan gashaneyn. Ha tagin gargaarka degdegga ah ee isbitaalada arrin aad u arki karto dhakhtarka degdegga ah haddii aad ogolaasho ka heysan MHS / NHP.

Daryeelka Caafimaadka Marka Aad Safarka Tahay

Waa inaad u hogaansataa sharciyadan marka aad dooneyso daryeel caafimaad laakiin aad safar ku jirto.

- Xaaladaha degdegga ah, tag dhakhtarka ama isbitaalka kuugu dhow. Soo wac MHS / NHP ee 1-888-713-6180 si aad noola socodsiiso waxa dhacay.

- Daryeelka degdegga ah iyo daryeelka caadiga ah marka aad safarka ku jirto, waa inaad heysataa ogolaashaheena inaad aragto dhakhtar kale ama isbitaal. Kuwaas waxaa ka mid ah caruurta ka maqan guryahooda oo la jooga waalid kale ama qaraabo kale. Soo wac 1-888-713-6180 si aad u hesho ogalaashaha inaad aragto dhakhtar kale.

Daryeelka uureyda iyo Dhalmada

Haddii aad uur qaado, fadlan degdeg ula socodsii MHS / NHP iyo sarkaalka qaabilsan dakhligaaga (IM, income maintenance) si aad u hesho daryeelka aad u baahan tahay. Lacagta la bixiyo marka aad dhakhtarka aragto lagaama doonayo xiliga uurka.

Waa in aad tagtaa isbitaalka MHS / NHP si aad ilmaha ugu dhasho. Kala hadal dhakhtarka MHS / NHP si aad u xaqiijiso inuu la socdo isbitaalka aad tageyso marka ay fooshu ku qabto oo aad dhaleyso. Haku dhalin isbitaal aadan ogolaasho uga heysan ceymiska MHS / NHP. Dhakhtarka MHS / NHP waxa uu la socdaa xaaladaada caafimaadka waana dhakhtarka ugu haboon inuu ku caawiyo.

Sidoo kale, haddii aad safar galeyso bilaha ugu dambeeya ee uurka. Waxaanu dooneynaa inaad dhasho ilmo caafimaad qaba adigana aad caafimaad qabto, sidaa darteed ma aha xilli ku haboon safarka.

GOORMAA AYAA BIILKA ADEEGGA LAGUU QABTAY LAGUU SOO DIRAYAA

Adeegga Ceymisku Bixinayo iyo Kuwa Uusan Bixineyn

Sida u degsan BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI ceymiska ayaa bixiya adeegga laguu qabto marka laga reebo lacagta yar ee booqashada dhakhtarka. Lacagta aad bixiso booqashada dhakhtarka kama badnaan karto tan lagu xuso lacagta adeegga. Si aad u xaqiijiso in aan laguu soo dirin biilka adeegga laguu qabto, waa in dhakhtarkaagu ku jiraa shabakadda MHS / NHP. Xaaladda ka baxsan waa gargaarka degdegga ah. Haddii aad dooneyso in aad wax ka bixiso kharashka caafimaadka oo aad si toos ah lacag u siiso dhahtarka, waxa aad weydiin kartaa adeggyada aanu ceymisku bixin. Dhakhtarka isaga ayaa biil kuu soo dirsanaya adeegyada aanu ceymisku bixin oo ay kuu qabtaan.

Haddii biil laguu soo diro oo aadan ku raacsaneyn, fadlan soo wac 1-888-713-6180.

Lacagta Booqashada Dhakhtarka

Sida uu dhigayo BadgerCare Plus, MHS / NHP iyo dhakhaatiirtooda waxa laga yaabaa in ay kaa qaadaan lacag yar oo ah booqashada dhakhtarka. Bukaanada soo socda lagama doonayo in ay bixiyaan lacagta booqashada dhakhtarka:

- Xubnaha Medicaid SSI
- Kalkaalisada caafimadka ee guryaha ku soo booqata
- Haweeneyda uurka leh
- Xubnaha da'doodu ka yar tahay 19 sano jirka ah ee qabiilada dawladda dhexe aqoonsan tahay.
- Dadka da'doodu ku yar tahay 19 sano oo dakhligoodu ka hooseeyo heerka faqriga ee dawladda dhexe u aqoonsan tahay.

Adeegga Caafimaadka ee Lagaaga Fidiyo Meel Ka Baxsan Wisconsin

Haddii aad u safarto meel ka baxsan Wisconsin o aad u baahato daryeel caafimaad oo degdeg ah, dhakhtarka goobta lagugu daweeyo ha u soo diraan biilkooda MHS / NHP. Waxaa laga yaabaa in lacagta booqashada dhakhtarka lagaa qaado adeegga gargaarka degdegga ah ee ka baxsan Wisconsin.

MHS / NHP ma bixiyo kharash nooc kasta oo adeeg ah, oo ay ka mid yihiin gargaarka degdegga ah, oo ka baxsan Mareykanka, Canada iyo Mexico. Haddii aad u baahato gargaar caafimaad oo degdeg ah adiga oo ku sugan Canada ama Mexico, MHS / NHP wuu bixinayaa haddii uu dhakhtarkaas ama isbitaalkaas xisaab bangi ku leeyahay Mareykanka gudihiisa. Adeegyada qaarkood waxaa laga yaabaa in aad ogolaashaha ceymiska (HMO) u baahato haddii uu dhakhtarku xisaab bangi ku leeyahay Mareykanka. Fadlan la xiriir MHS / NHP haddii aad u baahato gargaar caafimaad oo degdeg ah adiga oo ku sugan meel ka baxsn Mareykanka.

Haddii biil laguu soo diro, la soo xiriir Waaxda Adeegga Macaamiisha ee 1-888-713-6180 durbadiiba.

Ceymiska kale

Haddii aad leedahay ceymis kale oo dheeraad ka ah MHS / NHP, waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga iyo kuwa kuu fidiya adeegga caafimaadka. Dhakhtarka iyo kuwa kuu fidiya adeegga caafimaadka waa in ay biilka u diraan ceymiska kale ka hor inta aanay u soo dirin MHS / NHP. Haddii dhakhtarka ama kuwa kale ee kuu fidinaya adeegga caafimaadka aanay qaadan MHS / NHP, la soo xiriir diiwaan gelinta gaarka ah ee HMO ee 1-800-291-2002. Shaqaalaha Isdiiwaangelinta Gaarka ah ayaa kuu sheegaya sida aad u adeegsaneyso labada ceymis.

Adeegyada uu Kharashkooda Bixiyo MHS / NHP

MHS / NHP ayaa mas'uul ka ag inay kula socodsiiyaan adeegyada caafimaad ee ay bixiyaan sida uu dhigayo BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI.

Caafimaadka Dhimirka iyo Isticmaalka Maandooriyayaasha

MHS / NHP ayaa ku siinaya adeegga caafimaadka dhimirka iyo istimalka maandooriyayaasha (khamriga iyo maandooriyayaasha) ee xubnaha oo dhan loogu talo galay. Haddii aad dooneyso adeeggan la soo xiriir 1-888-713-6180. Haddii aad u baahan tahay caawinaad degdeg ah, waxa aad la soo xiriirtaa Khadka Masiibooyinka ee 1-888-713-6180 ama khadka Kalkaaliyaha Caafimaadka ee 1-888-713-6180 kaas oo furan 24ka saac todobada cisho ee todobaadka.

Dhamaan adeegyada ay bixiyaan MHS / NHP waa qarsoodi.

Kala Fogeynta Dhalaanka

Dhamaan xubnaha oo dhan waxaa loo fidiyaa adeegga kala fogeynta dhalaanka oo ay ku jiraan kuwa aan weli qaan gaarin. Haddii aadan dooneyn in aad dhakhtarkaaga kala hadasho kala fogeynta dhalaanka, la soo xiriirka Adeegga Macaamiisha 1-888-713-6180. Waxaanu kaa caawineynaa inaad ka doorato MHS / NHP dakhtarka kala fogeynta oo ka duwan dhakhtarkaaga joogtada ah.

Waxaanu idinku dhiirigelineynaa inaad adeegga kala fogeynta dhalaanka ka qaadataan dhakhtar ku jira shabakadda MHS / NHP si aanu ugala xiriiri karno waxyaabaha la xiriira caafimaadkiina. Hase yeeshee, waxa aad tagi kartaa goobaha loogu talo galay kala fogeynta dhalaanka ee qaata kaarka ForwardHealth, xitaa haddii aysan ka diiwaan gashaneyn MHS / NHP.

Adeegga Caafimaadka Ilkaha

MHS / NHP ayaa kula socodsiinaya adeegga ilkaha ee ay bixiyaan. Waa in aad tagtaa dhakhtarka ilkaha ee ku jira liiska MHS / NHP. Akhri Liiska Dhakhaatiirta ama soo wac Adeegga Macaamiisha 1-888-713-6180 si aad u aragto magacyada dhakhaatiirta.

Macaamiisha MHS / NHP waxa ay xaq u leeyihiin baaritaanka ilkaha hal mar 90kii maalmoodba oo qoraal ama telefoonka kaga codsato Waaxda Adeegga Macaamiisha.
Milwaukee, Waukesha, Ozaukee, Washington, Racine, Kenosha Counties.

Adeegga Ilkaha waxa uu ka mid yahay macaashka BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI. Waxa aad adeegga ilkaha ka heli kartaa dhakhaatiirta ka diiwaan gashan Medicaid ee qaata kaarta ForwardHealth. Si aad u hesho liiska dhakhaatiirka ka diiwaan gashan Medicaid:

1. Soo booqo www.forwardhealthwi.gov.
2. Guji ama dooro 'Members' ee qeybta dhexe ee bartamaha bogga.
3. Hoos u raac ilaa aad gaarto 'Resources'.
4. Ka sii dooro 'Find a Provider'.
5. 'Program' hoostooda ka dooro BadgerCare Plus.

Ama waxaad la soo xiriiri kartaa telefoonka lacag la'aanta ah 1-800-362-3002.

Haddii ay jirto xaalad degdeg ah oo aad dhakhtar ilkaha ah ugu baahan tahay, xaq waxa aad u leedahay in aad daaweyn ku hesho 24 saac gudahood marka aad codsatay. Xaalad degdeg ah oo ilkaha ah waa marka aad dooneyso in aad markiiba aragto dhakhtarka ilkaha oo kaa daweeya xanuun aad u daran, barar, qandho, caabuq, ama dhaawac ilkaha kaa gaaray. Haddii aad u baahan tahay xaalad degdeg ah oo ilkaha ah:

- Haddii aad leedahay dhakhtar ka diiwaan gashan MHS / NHP:
    - La xiriir xafiiska dhakhtarka ilkaha.
    - U sheeg xafiiska dhakhtarka in adiga ama ilmahaaga ay doonayaan in ay degdeg u arkaan dhakhtarka ilkaha.
    - U sheeg xafiiska dhakhtarka waxa ay dhibaatadu tahay si faahfaahsan. Sida xanuun ilkaha oo aad u daran ama wajiga oo bararsan.
    - Na soo wac haddii aad dooneyso gaadiid ku qaada ama kaa soo qaada dhakhtarka.

- Haddii aadan **LAHEYN** dhakhtar aan ka diiwaan gashan MHS / NHP:
    - Soo wac *[Note to HMO: insert dental benefits manager or HMO, as appropriate.]*. U sheeg xafiiska dhakhtarka in adiga ama ilmahaaga ay doonayaan in ay degdeg u arkaan dhakhtarka ilkaha. Waxa aan kaa caaawin karnaa in aad hesho dhakhtarka ilkaha.
    - Na soo wac haddii aad dooneyso gaadiid ku qaada ama kaa soo qaada dhakhtarka.

Adeegga Duugduugista

Adeegga duugduugita waxa uu ka mid yahay macaashka BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI. Waxa aad adeegga duugduugga ka heli kartaa dhakhaatiirta ka diiwaanshagan Medicaid ee qaata kaarta ForwardHealth. Si aad u hesho liiska dhakhaatiirka ka diiwaan gashan Medicaid:

1. Soo booqo www.forwardhealthwi.gov.
2. Guji ama dooro 'Members' ee qeybta dhexe ee bartamaha bogga.

3. Hoos u raac ilaa aad gaarto ‘Resources’.
4. Ka sii dooro ‘Find a Provider’.
5. ‘Program’ hoostooda ka dooro BadgerCare Plus.

Ama waxaad la soo xiriiri kartaa telefoonka lacag la'aanta ah 1-800-362-3002.

Adeegga Aragga

MHS / NHP waxa uu bixiyaa adeegga aragga (indhaha) oo ay ka mid yihiin indho gashiga; hase yeeshee, sharciyo xadidaya ayaa jira. Waxa aad soo wici kartaa Adeegga Macaamiisha ee 1-888-713-6180.

Adeegga Daaweynta Aamusiyaha (Autism)

Daaweynta Aamusiyaha waxa uu ka mid yahay macaashka BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI. Waxa aad adeegga aamusiyaha ka heli kartaa dhakhaatiirta ka diiwaanshagan Medicaid ee qaata kaarta ForwardHealth. Si aad u hesho liiska dhakhaatiirka ka diiwaan gashan Medicaid:

1. Soo booqo www.forwardhealthwi.gov.
2. Guji ama dooro ‘Members’ ee qeybta dhexe ee bartamaha bogga.
3. Hoos u raac ilaa aad gaarto ‘Resources’.
4. Ka sii dooro ‘Find a Provider’.
5. ‘Program’ hoostooda ka dooro BadgerCare Plus.

Ama waxaad la soo xiriiri kartaa telefoonka lacag la'aanta ah 1-800-362-3002.

Addegga Baaritaanka Caafimaadka (HealthCheck)

HealthCheck waa barnaamij laga bixiyo dhaman baaritaanka caafimaadka, oo ay ka mid yihiin daaweynta dhibaatooyinka lagu ogaado baaritaanka, ee dadka da’doodu ka yar tahay 21 sano. Baaritaanka noocan ah waa mid aad muhim u ah. Dhakhaatiirtu waxa ay doonayaan in ay si joogta ah u arkaan dadka da'doodu ka yar tahay 21 sano, ma aha kilya marka ay xanuunsan yihiin.

Sadex ujeeddo ayaa laga leeyahay barnaamijka HealthCheck:

1. In lagu ogaado oo laga daweeyo dhibaatada caaafimaad ee dadka da’doodu ka yar tahay 21 sano.

2. In la kordhiyo wacyi gelinta adeegga caafimaad ee gaarka ah ee dadka da’doodu ka yar tahay 21 sano.

3. Si dadka da’doodu ka yar tahay 21 sano ay xaq ugu yeeshaan qaar ka mid ah adeegga caafimaadka ee aan laga yaabo ineysan xaq u yeelan laheyn.

Baaritaanka caafimaadka ee HealthCheck waxaa ka mid ah:

- Talaalka da’da la socda (talaalka)
- Baaritaanka kaadida iyo dhiiga (oo ay ka mid yihiin heerka dhiigga ee da’da ku haboon).
- Baaritaanka ilkaha iyo in la socda dhakhtarka laga bilaabo marka uu jiro 1 sano.
- Taariikhda caafimaadka iyo koritaanka.

- Baaritaanka caafimaadka
- Baaritaanka jirka
- Baaritaanka aragga

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan HealthCheck waxa aad soo wici kartaa Adeegga Macaamiisha ee 1-888-713-6180.

Haddii aad dooneyso gaadiid ku geeya ama kaa soo qaada balanta HealthCheck fadlan soo wac Department of Health Services (DHS) ee maamulaha gaadiidka (NEMT) ee xaaladaha aan degdegga aheyn ee 1-866-907-1493 (ama TTY (dadka maqalku ku adag yahay) ee 1-800-855-2880) si aad u balansato gaadiid.

Adeegga gaadiidka

Adeegga caafimaadka ee xaaladaha aan degdegga aheyn waxaa laga helaa DHS ee maamulaha NEMT. Maamulaha NEMT ayaa diyaariya oo bixiya gaadiidka xubnaha aan heysan si kale oo ay dhakhtarka ay ku tagaan. Gaadiidka caafimaadka ee aan degdegga aheyn waxaa ka mid ah gaadiidka loo isticmaalo:

- Gaadiidka dadweynaha sida basaska magaalada
- Amabalaansiga xaaladaha aan degdegga aheyn
- Gaadiidka caafimaadka ee gaarka ah
- Noocyada kale ee gaadiidka, taasoo ku xiran baahida caafimaad ee bukaanka

Waxaa intaa dheer, haddii aad gaarigaaga gaarka ah u adeegsaneyso balanta aad dhakhtarka ku tagto, waxaa suurogal ah in inta mayl ee aad waddo lacag laguugu celiyo.

Gaadiidka caadiga ah waa in aad balansataa ugu yaraan laba maalmood ka hor balanta dhakhtarka. Waxa aad sameyn kartaan balan si joogta ah laguu qaado adiga oo soo wacaya maamulaha NEMT ee 1-866-907-1493 (ama TTY (dadka maqalku ku adag yahay) 1-800-855-2880), Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 7da aroornimo ilaa 6da galabnimo. Sidoo kale waxa aad u balansan kartaa balamada degdegga ah. Balamada dhakhtarka ee degdegga ah waa sadex saacadood ama ka yar.

Macaashka Daawada

Waxaa laga yaabaa inuu daawo kuu qoro dhakhtarka, dhakhtar takhasus gaar ah leh ama kan ilkaha MHS / NHP. Ceymisku waxa uu bixinayaa daawada iyo qaar ka mid waxyaabaha aad uga baahan tahay farmashiyayaasha qaata kaarka ForwardHealth.

Waxaa laga yaabaa in xoogaa lacag ah lagaa aqaado ama la xadido inta uu ceymisku bixinayo. Haddii aadan awoodin bixinta qeybta kugu soo beeganta, weli daawada waa lagu siinayaa.

QIIMEYNTA DARYEELKA/BAAHIDA CAAFIMAADKA (ee Caruurta iyo Dadka Waaweyn ee aan caruurta laheyn BadgerCare Plus Childless Adults iyo SSI Managed Care)

Adiga oo ka tirsan xubnaha MHS / NHP waxaa laga yaabaa inuu kula soo xiriiro qof shaqaalaha ka tirsan oo wax kaa weydiiyo baahidaada caafimaadka. Ceymiskaaga HMO ayaa kula soo xiriiraya 60ka cisho ee ugu horeeya marka aad iska diiwaan geliso MHS / NHP si aad balan u

sameysataan aad kaga wada hadashaan taariikhdaada caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka. Waa muhim in aad la hadasho HMO si aad u hesho daryeelka caafimaadka ama adeegga aad u baahan tahay. Haddii aad qabto wax su'aal ah oo aad jeceshahay inaad la xiriirto MHS / NHP si toos ah oo aad u sameysato balan aad kaga hadasho baahidaada caafimaadka, fadlan soo wac 1-888-713-6180.

HADDII AAD GUURTO

Haddii aad qorsheyneyso inaad guurto, la xiriir Hay'adda la Socoshada Dakhliga (IM, Income Maintenance). Haddii aad u guurto degmo kale, waa inaad la xiriirtaa hay'adda IM ee degmada oo aad la socodsiisaa si loo hubiyo inaad xaq u leedahay BadgerCare Plus ama Medicaid SSI.

Haddii aad ka guurto dhulka uu adeegga ka bixiyo MHS / NHP, la soo xiriir Shaqaalaha Isdiiwaangelinta Gaarka ah ee HMO ee 1-800-291-2002. Shaqaalaha HMO ee Isdiiwaangelinta Gaarka ah ayaa kaa caawinaya sidii aad ku heli laheyd HMO ka shaqeeya degaanka cusub ee aad u guurtay.

HELITAANKA RA'YI LABAAD EE CAAFIMAADKA

Haddii aadan ku raacsaneyn talo soo jeedinta dhakhtarka ee la xiriirta xaaladdaada caafimaadka, waxa aad weydiisan kartaa ra'yiga dhakhtar kale. Waxa aad la soo xiriir kartaa dhakhtarkaaga ama wici kartaa Adeegga Macaamiisha ee 1-888-713-6180.

XAALADAHA GAARKA AH EE HMO

Guud ahaan, waa in qofku iska diiwaan geliyaa HMO si uu adeeg caafimaad uga helo BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI. Xaaladaha gaarka ee HMO waxaa loo jeedaa marka aysan waajib kugu aheyn inaad is diiwaangeliso si aad u hesho daryeel caafimaad. Inta badan xaaladaha gaarka ah waa mid la ogolaado muddo gaaban, inta badan si bukaanku u helo daaweyn muddo gaaban ah ka hor inta aanu iska diiwaan gelin HMO. Haddii aad is leedahay xaalad gaar ah ayaa jirta oo lagaaga daayo isdiiwaangeliunta, la soo xiriir Shaqaalaha Isdiiwaangelinta Gaarka ah ee HMO ee 1-800-291-2002 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

HALKA AAD KA HELI KARTO CAAWINAAD MARKA AAD SU'AAL QABTO AMA DHIBAATO KU SOO GAARTO

U Doodaha Xubnaha ee MHS / NHP

MHS / NHP waxa uu leeyahay U Doodaha Xubnaha oo kaa caawin kara sidii aad ku heli laheyd daryeelka aad u baahan tahay. Waa in aad la xiriirtaaa U Doodaha Xubnaha si uu kaa caawiyo wixii su'aal ah ee aad qabto ee ku saabsan daryeelka caafimaadka iyo xalinta dhibaatada ku heysata ee helitaanka daryeel caafimaad ee MHS / NHP. U Doodaha Xubnaha waxa aad kala xiriir kartaa 1-888-713-6180.

U doodaha (Xubnaha Medicaid SSI kaliya]

Haddii aad dhibaato kala kulanto helitaanka adeegga caafimaadka iskana diiwaangelisau MHS / NHP adiga oo heysta Medicaid SSI la xiriir U Doodaha Xubnaha SSI ee 1-888-713-6180.

Barnaamijka Gacan Siinta HMO ee Gobolka Wisconsin

Gobolku waxa uu magacaabay Gargaare (dadkaas oo dhexdhexaad ah, qarsoodi ka dhiga kuguna caawiya macluumaad) kaasoo kaa caawinaya wixii su'aalo ah ee aad qabtaan ama dhibaatada xubnaha HMO. Gargaarahaasu waxa ay kuu sheegi karaan halka aad ka heleyso daryeelka aad u baahan tahay ee HMO. Waxa kale oo gargaaruhu kaa caawin karaa xalinta dhibaatada ama cabashooyinka aad ka qabtaan barnaamijyada HMO iyo xogta ku saabsan HMO. Soo wac 1-800-760-0001 oo weydiiso inaad la hadasho Gargaare.

SOO GUDBINTA CABASHO, DACWO AMA RACFAAN

Cabashooyinka ama Dacwooyinka

Waxaanu dooneynaa inaan ogaano haddii aad weligaa ka diiwaan gelisay cabasho MHS / NHP ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka. Fadlan soo wac u doodaha xubnaha ee MHS / NHP ee 1-888-713-6180 ama noogu soo dir cabashadaada cinwaanka hoos ku qoran:

MHS / NHP
10700 W Research Dr. #300
Milwaukee, WI 53226

Haddii aad dooneyso inaad kala hadasho dhibaatadaada qof ka baxsan MHS / NHP, soo wac Shaqaalaha Isdiiwaangelinta Gaarka Ah ee HMO ee 1-800-291-2002. Shaqaalaha Isdiiwaangelinta Gaarka Ah ayaa kaa caawinaya xalinta dhibaatada ama u soo qor cabasho rasmi ah MHS / NHP ama BadgerCare Plus iyo barnaamijyada Medicaid SSI.

Cinwaanka aad cabashadaada ku soo diri kaartaa ee barnaamijyada BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI:

> BadgerCare Plus and Medicaid SSI
> Managed Care Ombuds
> P.O. Box 6470
> Madison, WI 53716-0470
> 1-800-760-0001

Haddii cabashadaada ama dacwadaadu u baahan tahay in markiiba wax lag qabto waayo iyada oo dib loo dhigo waxa ay khatar ku tahay caafimaadkaaga, fadlan soo wac MHS / NHP sida ugu dhaqsaha badan 1-888-713-6180.

Laguulama dhaqmaayo si ka duwam sida loola dhaqmo xubnaha kale taasoo ku saleysan inaad cabasho ama dacwad aad soo gudbisay.

Racfaanka

Waxa aad xaq u leedahay inaad racfaan u qaadato gobolka Wisconsin, Division of Hearings and Appeals (DHA), oo aad codsan karto dhageysi cadaalad ah haddii aad aaminsan tahay in ceymiskaaga si aan sax aheyn loo diiday, xadiday, yareeyey, dib loodhigay ay u joojiyeen MHS / NHP. Codsigaaga waa in la soo gudbiyaa ugu dambeyn 45 cisho gudahood ka dib marka ay xubintu gaarto go'aanka ay racfaanka ka qaadaneyso. Haddii aad racfaanka ka qaadato ka hor taariikhda uu dhaqangalayo go'aanka, adeeggu wuu kuu soo soconayaa. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto inaad bixiso adeegga laguu qabtay haddaii aadan ku guleysan racfaanka.

Haddii aad dooneyso dhageysi, codsigaaga ku soo dir:

Department of Administration, Division of Hearings and Appeals, P.O. Box 7875
Madison, WI 53707-7875

Dhageysiga waxaa qaadaya qaali xaga maamulka qaabilsan ee fadhigiisu yahay degmada aad ku nooshahay. Xaq waxaad u leedahay in lagu matalo dhageysiga, waadna soo kaxeysan kartaa saaxiib kula socda. Haddii aad u baahan tahay adeeg gaar ah oo naafanimadaada la xiriira ama turjubaan, fadlan soo wac 1-608-266-3096 (cod) aa 1-608-264-9853 (dadka maqalku ku adag yahay).

Laguulama dhaqmaayo si ka duwam sida loola dhaqmo xubnaha kale taasoo ku saleysan inaad dhageysi codsatay. Wax saameyn ah kuma yeelaneyso ceymiskaaga.

Haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo qoritaanka codsiga dhageysiga, fadlan soo wac Xafiiska (gargaaraha) BadgerCare Plus iyo Medicaid SSI ee 1-800-760-0001 ama Shaqaalaha Isdiiwangelinta Gaarka ah ee 1-800-291-2002.

XUQUUQDAADA

La Socoshada Barnaamijka Dhiirigelinta ee Dhakhtarka

Waxa aad xaq u leedahay inaad na weydiiso haddii ay jirto hab gaar ah oo aad ku bixin karto lacagta dhakhtarka oo saameyn ku yeelan karta dhakhtarka laguu diro iyo adeegyada ay kuu qabtaan. Si aad u hesho macluumadkaas, La soo xiriir Waaxda Adeegga Macaamiisha 1-888-713-6180 oo codso sida aad u bixin karto lacagta dhakhtarka.

Ogaashaha Shahaadooyinka Aqooneed ee Dhakhtarka

Waxa aad xaq u leedahay inaad ogaato macluumaadka la xiriira dhakhaatiirteena oo ay ka mid yihiin heerkooda aqooneed, ururada ay xubnaha ka yihiin iyo cusbooneysiinta shatiyadooda. Si aad u ogaato macluumaadkaas, waxa aad soo wici kartaa Waaxda Adeegga Macaamiisha ee 1-888-713-6180.

Buuxinta Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka, Dhaxalka, iyo Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka

Waxa aad xaq u leedahay in aad go'aan ka gaarto daryeelka caafimaadka ee laguu fidiyo. Xaq waxa aad u leedahay inaad ogolaato ama diido daaweynta ama qaliinka laguu soo jeediyo. Xaq waxa aad u leedahay inaad qorsheyso oo aad hagto daryeelka caafimaadka ee laguu fidiyo mustaqbalka marka aadan adigu ismaamuli karin. Waxa aad dhakhtarkaaga u sheegi kartaa sida lagaa yeelayo adiga oo buuxinaya dardaaranka caafimaadka, dardaaranka dhaxalka ama wakiilashada daryeelka caafimaadka. La xiriir dhakhtarkaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Waxa aad xaq u leedahay inaad dacwad u soo gudbiso Division of Quality Assurance ee DHS haddii aan la raacin dardaarankaaga caafimaadka, dardaaranka dhaxalka, iyo awood siinta daryeelka caafimaadka. Waxa aad codsan kartaa in lagaa caawiyo diiwaangelinta dacwada.

Xaqa aad U leedahay Diiwaanka Caafimaadka

Xaquuqo waxa aad u leedahay in nuqul lagaaga sameeyo diiwaankaaga caafimaadka. Waan kaa caawin karnaa sidii aad ku heli laheyd nuqulkaas. Fadlan soo wac 1-888-713-6180 si laguu caawiyo. Waxaa suurogal in aad bixiso lacagta nuqul lagaaga sameeyo diiwaankaaga caafimaadka. Waad sixi kartaa haddii ay ku jiraan macluumaad khalad ah diiwaankaaga caafimaadka haddii uu dhakhtarku kugu raaco.

Xuquuqda Xubnaha Ceymiska

- Waxa aad xaq u leedahay in laguugu yeero turjubaan xilliga daaweynta ee ay bixinayaan BadgeCare Plus and Medicaid SSI.

- Waxa aad xaq u leedahay in macluumaadka ku xusan buugan laguugu tarjumo afaf kale iyo habab kale.

- Waxa aad xaq u leedahay in alaguu fidiyo adeegga caafimaadka sida ay dhigayaan sharciyada dawladda dhexe iyo kuwa gobolka. Dhamaan adeegyada ceymisku bixiyo waa in laguu diyaariyaa oo fidiyaa. Marka ay caafimaad ahaan ku haboon tahay, adeegga waa in laguu qabtaa 24 saac gudahood, todobada cisho ee todobaadka.

- Xaq waxa aad u leedahay in lagu kala dooransiiyo daaweynta oo ay ka mid tahay inaad ra'yi kale weydiiso dhakhtar.

- Xaq waxa aad u leedahay in aad go'aan ka gaarto daryeelka caafimaadka ee laguu fidiyo.

- Xaq waxa aad u leedahay in si ixtiraam iyo sharaf leh laguula dhaqmo.

- Xaq waxa aad u leedahay in aan awood iyo xoog laguu isticmaalin sida khasab, xakameyn, ama ciqaabid.

- Xaq waxa aad u leedahay in aad xuquuqdaada si xoriyad ah u hesho oo aadan ka cabsan aargudasho kaaga timaadda HMO iyo dhakhaatiirta.

Xuquuqdaada Madaniga ah

MHS / NHP waxa ay u adeegtaa dhamaan xubnaha xaqa u leh iyada oo aan lagu kala soocin:

- Da'da
- Midabka
- Naafanimada
- Halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan
- Qowmiyadda
- Jinsiga

Dhamaan adeegyada caafimaadka waa mid ay u siman yihiin xubnaha oo dhan si isku mid ahna logu fidiyo. Dhamaan shaqsiyaadka iyo hay'adaha ku xiran MHS / NHP oo xubnaha u dira adeegyada waa in ay sidaas oo kale ula dhaqmaan xubnaha oo dhan.